




Global Storybooks

globalstorybooks.net

Mir yar: Sheekadii Wangari

Mathay

✎ Nicola Rijdsdijk
🔗 Maya Marshak
📖 Anwar Mohamed Dirie



This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 4.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0).
<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>



**Mir yar: Sheekadii
Wangari Mathay**



🗺️ Soomaali

|| 3

✎ Nicola Rijdsdijk
🔗 Maya Marshak
📖 Anwar Mohamed Dirie



Tuulo ku taal dhinaca hooseyo
buurta Kenya ee Bariga Afrika,
gabar yar ayaa hooyadeed kala
shaqeyn jirtay beeraha. Magaceedu
waxa uu ahaa Wangari.

Wangari bannaanka ayay aad u
jeclaan jirtay. Baangad ayay ku
qodqodday carrada beerta
qoyskooda. Waxayna dhulka
qandacsan ku aastay miro aad u
yaryar.





Watigay ugu jeclayd maalinta waxa uu ahaa marka ay cadceeddu dhacdo. Marka ay mugdi saaid u noqoto aragtida dhirta, Wangari waxay ogaataa in ay tahay xilligii ay guriga aadi lahayd. Waxayna qaadaa waddoyin dhuudhuuban oo dhex maro beeraha, ayadoo gudbeyso webi yaal markay baxdo.


Wangari waxa ay dhimatay 2011, laakiin waa aannu xusuusannaa mar walba oo aan aragno geed qurux badan.

Wangari si adag ayay u shaqaysay.
 Dadka dunida oo dhan ayaa
 ogaaday, waxaa na la siiyey
 abaalmarin caan ah. Waxa la
 yiraahdaa Abaalmarinta Nabada ee
 Nobel, waxa ayna noqotay ee
 haweeneyda ugu horeysay ee
 kaliigeed Afrika laga siiyey abid.



Wangari waxa ay ahayd ilma fariid
 ah wayna sugi la eyd in ay iskuul
 aado. Laakiin hooyadeed iyo
 aabbaheed waxa ay doonayeen in
 ay joogto oo ay guriga ka caawiso.
 Markii ay toddoba jirsatay,
 walaalkeed ka weyn ayaa ku
 qalqaaliyey walaalkeed in ay u
 oggolaadaan in ay iskuul aaddo.





Way jeclayd in ay wax barato!
Wangari waxay wax ka baratay in badan oo badan buug walbey aqrisay. Iskuulka oo ay aad ugu wanaagsanaatey darteed waxaa lagu casuumay in ay wax ku barato dalka Maraykanka. Wangari waa ay faraxday! Waxa ay doonaysay in ay wax badan ka ogaato dunida.

Waxuu waqti gudbo ba, dhirtii cusbeyd waxa ay noqotay kayn, webiyadiina mar kale ayay biyo keeneen. Farriintii Wangari, Afrika ayay ku faaftay. Maanta, malaayiin geedo ah ayaa ka soo baxay mirihii Wangari.

Wangari way garanyay waxa ay tahay in la sameyo. Waxa ay bartay haweenkii sida dhirta miro looga abuurro. Haweenku dhirta ayay sii iibin jireen lacagta ka soo baxdana waxay u isticmaali jireen in ay qoyasaskooda ku daryeelaan. Haweenkii waxa ay noqdeen kuwo faraxsan. Wangari ayaa ka caawisay in ay dareemaan awoodooda iyo xoog.



Wangari wax badan oo cusub ayay ku baratay jaamacada maraykanka. Waxa ay baratay dhirta iyo sida ay u baxaan. Waxa ayna xusuusatay sidii ay usoo kortay: la ciyaarki walaaladeed hooska geedaha kaymihii qurxoonaa ee Kenya.





Markii ay wax sii baratuba, waxa ay sii ogaanaysay in ay dadka Kenya aad u jeceshahay. Waxa ay doonaysay in ay noqdaan kuwo faraxsan oo xor ah. Markii ay wax sii baratuba, waxa ay soo xusuusan jirtay gurigeedii Afrika.



Markii ay wax barashadeedii dhammeysatay, waxa ay ku noqotay Kenya. Laakiin wadankeedii waa is beddelay. Beero baaxad leh ayaa is daba jiidnaa dalki. Haweenku ma heysan xaabo ay wax ku karsadaan. Dadku fakhri ayay ahaayeen, carruurtuna waa ay gaajeysnaayeen.